

# Wargeyska Mountain View

## Abriil 19, 2017

Talaado, Abriil 25.....Bandhigga Dheesha Darajada Shanaad ee lagu qaban doono Dugsiga Sare West

Arbaco, Abriil 26.....Darajada Shanaad Waxay Tagi Doontaa Jaamacadda Utah, Mashruuca Dhallinta

Arbaco, Abriil 26.....Qoraha, Sandra Cisneros Ayaa Soo Booqan Doonto Darajada Shanaad

Talaado, Maajo 2.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30, Qolka 182, CLC Jimco, Maajo 12.....Taariikhda ugu Dambeyso ee laga Qeybgalo Tartanka Fanka Mountain View

### Fariinta Agaasimaha

Dhawaanahaan, Waaxda Sinaanta iyo u Doodidda Waxbarashada (Department of Educational Equity and Advocacy) ee Dugsiga Dagmada Salt Lake City waxay qabatay Tartanka Fanka Luqadda (Language Arts Contest) Cesar Chavez. Arday badan oo ka tirsan Mountain View ayaa qoraalkooda geliyay tartanka. Ardayda soo socota waxaa lagu abaal mariyay shaqadooda:

Guuleystaha Abaal Marrinta Sare Darajada 2<sup>aad</sup>: Bianka Chavez  
Guuleystaha Booska Kowaad Darajada 2<sup>aad</sup>: Jonathan Puerta  
Guuleystaha Booska Saddaxaad Darajada 2<sup>aad</sup>: Fancisco Vargas  
Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Alison Zarate  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Brennah Lever  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Bianka Chavez  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Camila Godinez  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Cesar Mendoza  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 2<sup>aad</sup>: Lindsay Perez  
Guuleystaha Abaal Marrinta Sare Darajada 4<sup>aad</sup>: Isabella Raso  
Guuleystaha Booska Labaad Darajada 4<sup>aad</sup>: Yoselin Martinez  
Guuleystaha Booska Saddaxaad Darajada 4<sup>aad</sup>: Karen Zamora Bonilla  
Guuleystaha Aqoonsiga Sharafta Darajada 4<sup>aad</sup>: Jacqueline Martinez

Hambalyo dhamaan! Waxaad sharaf u yeeshen Mountain View!

### Tartanka Fanka Mountain View

Gugaan, waxaan qaban doonaa tartanka fanka. Fikradda tartankena fanka waa "Ku Dhaqan Sharciga Dahabiga." Sharciga Dahabiga waa in loola dhaqmo dadka kale sida aad adiga rabtid in laguula dhaqmo. Ardayda waxay ka qeybgeli karaan fanka qeybaha soo socda: dheesha, safafka dheesha, suugaanta, soo saarka muusikada, sawirada, iyo fanka la daawado. Ardayda waxay

geli doonaan mid ka mid ah labada qeyb, pre-K ilaa darajada labaad ama darajada saddaxaad ilaa darajada shanaad. Si ay u galaan, ardayda waa in ay fankooda u gudbiyaan macalinka fasalkooda ugu dambayn dhamaadka maalin dugsiyeedka, bisha Maajo 12. Waxaan rabnaa in qof kasta uu iminka ogaado si uu u helo waqti ku filan uu uga shaqeeyo gelitaankiisa. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ama koobi kale oo ku saabsan sharuudaha, waxaad u tagi kartaa Mr. Elliott oo laga helo Qolka 102 ama waxaad weydiin kartaa xafiiska weyn.